

Ibsiga Guriga kadib La-wareegistiisa ama Masalifnimada

Waxaa laga yaabaa in aad awoodid in aad iibsato guri kadib la wareegistiisa ama masalifnimada.

GURI IIBIYE® ayaa kaa caawin kara inaad dib ugu noqoto jidka Lahaansho guri.

Sidee ayey la wareegis guri ama masalifnimo u saamaysaa amaahda?

- Faahfaahin ku saabsan warbixinta amaahdaada ayaa laga yaabaa in la hayo muddo 7-10 sano ah.
- Ma jirto xaddi gaar ah oo lacageed ama hab-xisaabeed lagu ogaado qadarka ay saameyn xun ugu yeelan karto heerka qiyaasta amaahdaada.
- Marka hore way kugu adkaan doontaa inaad hesho ogolaansho amaaheed.
- Dayactirka Amaahda iyo dib u dhiska amaahda waa qayb muhiim ah oo ka mid ah isu diyaarinta iibsiga guri mar kale.

Sidee ayaad dib ugu dhisi kartaa amaahdaada?

- Kala hadal GURI IIBIYAHAAGA® wixii ku saabsan dayactirka amaahda shirkado xirfadlayaal oo sumcad leh.
- Dib ula eeg warbixinta amaahda saddex (3) xafiis warbixineed si loo eego saxsanaanta.
- Maskaxda ku hay in dhibcaha amaahda lagu hagaajin karo waqti.
- Raac qorshe miisaaniyadeed oo bil kasta ah ama qorshaha kharashka.
- Bixi biilashaada waqtigooda mar kasta.
- Dhis kaydkaaga. Xataa qaddar yar oo bil kasta ah ayaa caawin doona.
- Yaree ama baabi'i amaahdaada kugu harsan.
- Ku ekoow shaqadaada (waxa ugu habboon loo shaqeeyahaaga hadda ama isla mihnadda).

Maxay Amaah-Bixiyayaashu Tixgelin Doonaan?

- Amaah-bixiyayaashu waxay u baahan yihiin in codsadyaashu ay sugaan ugu yaraan 1-7 sano (hadba sida ay xaaladdu tahay) kana bilaabanta marka la diiwaangeliyo la wareegista guriga ama fulinta masalifnimada ka hor inta aanad codsan amah cusub. Kala hadal la-taliyaha amaahdaada inuu dib u eegis ku sameeyo xeerarka hadda.
- Waxaa la sameyn karaa xaalado sidaa ka reebban taasoo ku xiran xaaladda.
- Waxay si dheeri ah u eegi doonaan sida aad u maamushay amaahda tan iyo la wareegista guriga ama masalifnimada.
- Amaah-bixiyuhu waxaa uu inta badan codsan doonaa sharaxaad ku saabsan waxa keenay la wareegista ama masalifnimada si loo go'aansado suurtagalnimada inay mar kale dhacdo.

Maxaan ka Filan karaa Amaahda

- Marka ugu horreysa waxaa dhici karta inaad bixiso dulsaar in yar sareeya.
- Maskaxda ku hay in lacagta aad bixin doonto laga yaabo inay weli ka yaraato kirada, waxaa kaloo jira faa'iidooyin badan oo la xidhiidha lahaanshaha guriga.
- Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay jiri karaan barnaamijyo ku saabsan gargaarka xagga bxinta lacagta horumarinta oo kaa caawin doonta la kulanka ujeedooyinkaaga.

La xidhiidh GURI IIBIYE® si aad u bilowdo dhismaha kooxda xirfadlayaasha gurigaaga maanta!